# **Difaaca Guud –** Dhamaan Sweden oo wada socota



In kasta oo Sweden ay ka nabad badan tahay dalal kale oo badan, haddana waxaa jira khataro iyo hanjabaadyo ku wajahan nabadgelyadeena iyo madax-bannaanideena. Difaaca loo wada dhanyahay ee Sweden waa inuu ilaaliyaa oo difaaca dalka, xorriyadeena iyo xuquuqda aan ugu noolaano sida aan dooranay. Dhamaanteen howl ayaa ina saaran hadii Sweden Khatar gasho.

## Difaaca Guud

Difaaca guud wuxuu ku lug leeyahay dhammaan howlaha loo baahan yahay si loogu diyaariyo Sweden dagaalka. Difaaca guud wuxuu ka kooban yahay difaaca militariga iyo difaaca shacabka. Difaaca shacabka wuxuu ku saabsan yahay adkeysiga bulshada ee dagaalka iyo halista dagaalka.

## Maxaa khatar ina gelin kara?

aaladda siyaasadeed ee ka jirta aagga Sweden ayaa kutimid xagga nabadgelyada oo xumaatay sannadihii ugu dambeeyay. Caalamka, xaaladdu sidoo kale waa mid aan xasilloonayn.

Sweden waxaa si isdaba joog ah u sahmeynaya dhacdooyinka ka dhacaya adduunka inagu wareegsan. Hadii qalalaase siyaasadeed amni ama iskahorimaad hubeysan uu ka dhaco gobolka Badda Baltic ama Europe inteeda kale, sahmeyn ayaan ku yeelan doonaa. Xaaladda noocan oo kale ah, looma diidi karo in qaab militari oo xoog ama khal khal noocaas ah loola jeedo Sweden. Difaaca Guud  waa inuu awood u yeeshaa inuu wajaho weerar hubayssan ama falal kale oo dagaal oo ka dhan ah dalkeena.



### Difaaca shacabka

Difaaca shacabka waa shaqada ay qabtaan maamulada gobolada, degmooyinka, gobolada, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo ururada iskaa wax u qabso ah si loo ilaaliyo dadka rayidka ah oo ay tusaale ahaan sameeyaan daryeelka caafimaadka iyo gaadiidka. Difaaca shacabka ah sidoo kale waa inuu awoodaa inuu taageero Försvarsmakten (ciidamada qalabka sida).

### Difaaca militiriga

Difaaca milatariga wuxuu ka kooban yahay Försvarsmakten iyo Hemvärnet (Ilaalada Guriga) iyo sidoo kale tiro kale oo mas'uuliyiin ah. Försvarsmakten waxay difaacdaa dhulkeena iyo xuduudaha Sweden.

## Maxaan difaaceynaa?

Kaliyah ma difaacno xuduudaha dalkeenna iyo dhulkeenna, laakiin sidoo kale dhammaan qiimaha aan ku saley sanahay bulshadeenna. Waxaan sidoo kale u baahanahay inaan awood u yeelano illaalinta difaaca xaquuqda adanaha, xoriyadda hadalka iyo dimuqraadiyadda.


**Bogga xiga waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan waajibaaga haddii dagaal jiro ama khatar dagaal.**

Myndigheten för samhällsskydd och beredskap

## Waxaad ka midtahay difaaca guud

Sweden gudaheeda, waxaan leenahay waajibaad guud oo xagga difaaca ah. Tan macnaheedu waa in qof kasta oo halkaan ku nool oo u dhaxeeya 16 iyo 70 sano jir ah loo yeeri karo si uu uga caawiyo howlaha kala duwan haddii ay dhacdo dagaal ama khatar dagaal. Waxay noqon kartaa wadista gaadiidka, ka howl galka daryeelka caafimaadka, iskoolka barbaarinta ama qaab kale oo wax ku biirinaya  bulshada inay u shaqeyso sida ugu macquulsan.

Hadii aad hore ugu shaqeeneyse wax muhiim u ah bulshada, waxaa suuragal ah inaad sii waddo shaqada sidii caadiga ahayd. Qof walba waxaa ku waajib ah inuu wax ku darsado qof walbana waa loo baahan yahay.



## Marka bulshada aysan u shaqeynin sidii caadiga ahayd

Haddii dagaal dhaco ama khatar dagaal, inta badan adeegga bulshada ee caadiga ah waa mid aad u xaddidan maadaama ilaha waaweyn ay tahay in loo isticmaalo in lagu difaaco dalka. Soo dejinta alaabada muhiimka ah ma shaqeyn karto, iskafaaladda bakhaarka ayaa laga yaabaa inay faaruq noqdaan oo way adkaan kartaa in la helo dawooyin. Weerarada IT-ga ayaa burburin kara korontada shabakadda mobilada. Ka fikir sida adiga iyo dadka kugu ag wareegsan aad ula qabsan kartaan xaalad marka bulshada aysan u shaqeynin sidii aan ahaan jirnay.

## Sidee ayaad diyaar u tahay?

Haddii ay dhacdo xaalad cadaadis, waxaad u baahan tahay inaad kaligaa iskaa u maamusho dhowr maalmood, illaa toddobaad ama ka badan. Waxa ugu muhiimsan waa in la helo cunto, biyo la cabbo, kuleyl iyo fursad aad ku hesho macluumaad muhiim ah. Haddii aad diyaar garowdo, waxaad ka caawin doontaa dalka oo dhan inuu si fiican ula qabsado cadaadiska daran.

## Kaqeyb qaado macluumaadka muhiimka ah

Xaaladda halista ah, waxaad u baahan tahay inaad ka hesho macluumaad muhiim ah mas'uuliyiinta oo aad raacdo warbixinta warbaahinta. Hubso inaad haysato raadiye ku shaqeenaya koronto la'aan. Dhageyso Sveriges Radio P4 ama daawo Telefishinka Sveriges. Waa inay awoodaan inay baahiyaan macluumaadka dadweynaha ee muhiimka ah xitaa markay jiraan xaalado qasan.

## Ka feejignow wararka beenta ah

Xiliyada dagaalka ama cabsi dagaal, macluumaad been abuur ah iyo dacaayad ayaa la faafiyaa. Gobolada iyo ururada ayaa maanta adeegsada macluumaad marin habaabin ah si ay isugu dayaan inay sahmeyn ku yeeshaan qiimaheena iyo sida aan u dhaqanno. Ahow mid ka foojigan dhaliisha ila wareedka. Ka fikir macluumaadka aad ku baahineyso baraha bulshada

### Ahow il muhiiim ah

- Ma xaqiiqooyinbaa mise waa un fikrado?
- Waa maxay ujeedada macluumaadka?
- Ila wareedka malagu kalsoonaan karaa?
- Macluumaadka ma laga heli karaa meelo kale?
- Ma macluumaad hor lahaa mise waa mid hore sidoo kale maxaa  hada loo helayaa?

## Kaga qayb qaado sidaad awoodid

Haddii aad rabto inaad ku tabarucdo wax dheeraad ah, waxaad ku biiri kartaa urur difaaca iskaa wax u qabso ah. Waa urur hawlo gaar ah u haya dhibaatooyinka ama dagaalka. . Waxaa jira ururo badan oo kala duwan oo laga kala xusho. Faahfaahin dheeraad ah ka akhriso msb.se/ffo.

Waxa kale oo aad ku qaadan kartaa dadaalladaada meesha aad ku nooshahay, iskoolka, goobtaada shaqada ama arrimo kale.